

ISSUE

16

ALGASL

DECEMBER 2022

WARSIDAHHA DAWLADAHHA HOOSE EE SOMALILAND

MAGAALO

MAGAZINE



Ururka Dawladaha Hoose Ee Somaliland

MAGAALO MAGAZINE

Magaalo Magazine waa warsidde u adeega dawladdaha hoose ee Somaliland oo ay soo saarto ururka dawladdaha ee Somaliland (ALGASL)



ALGASL

Email : algasl.info@gmail.com
 Web : www.algasl.org
 Addr : Xaafada Shacabka ka soo Horjeedka Akadamiyada Nabada (APD)

TUSMADA

- 1 XILKA IYO WAAJIBAADKA GOLAYAASHA DEEGAANKA JS. ISKAASHIGA DEGMOOYINKA WALAALAHA AH
- 2 DIWAANGALINTA HANTIDA MAGUURTADA EE MAGAALADA GABILEY
- 3 SHAQO HUFAN
- 4 HORUMARINTA DUGSIYADA WAXBARASHADA EE DEGNAADA SHEIKH. HORUMARINTA WADDOYINKA IYO DEGNADA BAKI
- 5 DAWLADA HOOSE EE DEGMAADA LUGHAYA OO DHAGAX DHIGTAY XAFIISKA WASAARADA XANAANADA XOLAHA
- 6 DIB U HABAYNTA XAFIISKA DAWLADA HOOSE EE DEGMAADA LAASCAANOOD
- 7 BIYO GALINTA IYO DAYACTIRKA WADDOYINKA DEGMAADA LAAS QORAY
- 8 BUUGA WAX QABADKA DAWLADA HOOSE DEGMAADA XUDUN
- 9 WARSHADDA CONCRETE BATCHING PLANT- KA DAWLADA HOOSE EE HARGEYSA
- 10 HORUMARINTA LAAMIYADA MAGAALADA BURCO
- 11 GURIGA MARTIDA DEGMAADA GAR-ADAG. HORUMARINTA CAAFIMAADKA DEGMAADA DHAHAR
- 12 KA HOR TAGA CUDURKA DENGUE FEVER IYO DAWLADA HOOSE EE BEBRERA
- 13 HORUMARINTA ADEEGYADA CAAFIMAAD EE DEGMAADA BADHAN
- 14 DAYACTIRKA WADDOYINKA DEGMAADA BOORAMA.
- 15 DIB QALABAYNTA XARUMAHA DAWLADA HOOSE EE DEGMAADA TALEEX
- 16 TABABARKA DIYAARINTA QORSHE SANADEEDKA DEGMOOYINKA SOMALILAND
- 17 THE TRANSFORMATION OF KIGALI INTO AFRICA'S CLEANEST CITY
- 18 ABOUT ALGASL

XILKA IYO WAAJIBAADKA GOLAYAASHA DEEGAANKA JSL

Sida ku Xusan Qodobka 40aad, Faqradiisa Taad ee Xeer LR.23/2019 Golayaasha Deegaanka ee Degmooyinku waxay u xilsaaran yihiin awood buuxda u leeyihiin hawl kasta oo ka mid ah kuwa lagu tilmaamay qodobkan oo looga fadhiyo ka midho dhalintiisa iyada oo gole kasta oo la doortay uu ku koobnaan doono Xuduudka degmadiisa waana kuwan hoos ku taxan:

1. Xoojinta iyo kor u qaadista Nabadda, deganaanshaha, kala dambaynta iyo wanaajinta awaamiirta Dawliga ah.
2. Kobicinta iyo kor u qaadista kaabayaas-hadhaqaalaha sida jidadka magaalooyinka gudahooda.
3. Maamulka, horumarinta iyo kor u qaadista adeegyada Arrimaha Bulshada, sida waxbarashada, Caafimaadka, Beeraha, Xoolaha, Degaanka, Ganacsiga, Nabadgelyada, Laydhka, Biyaha, Igaadhsiinta, Nadaafadda I.W.M ee hoos yimaada awooda golayaasha degaanka ee degmooyinka.
4. Maamulka, iyo horumarinta fayadhawrka, bilicda, Dhiraynta, iyo dhismaha, dayactirka iyo daryeelka wadooyinka magaalooyinka iyo kaabayaasha hadhaqaalaha I.W.M ee dawlada hoose ee maamulka degmooyinka.
5. Aasaasida suuqyo badeeco, xoolaha iyo Kaluunka
6. Kormeerka dhismooyinka cusub, kuwa la cusboonaysiinayo iyo kuwa u baahan in ladumiyo.
7. Ka hor tagga dhibaataada abaarta, dufaanada, dabka halista ah iyo dhibaato

8. Daad guraynta dadweynaha hadii aafod dhacdo.
9. Diyaarinta iyo fulinta barnaamijyada iyo Mashaariicda horumarineed ee heer degmo.
10. Horumarinta Fank, Isboortiga iyo Suugaanta.
11. Dhismo goobo biyood oo magaalooyinka iyo tuulooyinka dhexdooda ah.
12. Samaynta iyo dayac tirka wadooyinka.
13. Soo jeedinta iyo codsiga wax ka beddalka iyo habaynta Naqshadda magaalooyinka Degmadu ka kooban tahay si waafaqsan xeerarka maamulka dhulka magaalooyinka.
14. Diwaan galinta hantida ma guurtada ah ee dadweynaha Degmada ku nool iyo tan Dawladaba, ee hoos yimaada masuuliyada golaha degaanka degmada.
15. Diwaan galinta hantida ma guurtada ah ee dadweynaha Degmada ku nool iyo tan Dawladaba, ee hoos yimaada masuuliyada golaha degaanka degmada.
16. Noolaynta Shaca'irta Islaamiga ah, wadaniga iyo Caalamiga.
17. Diyaarinta iyo oggolaanshaha dib u eegista Miisaaniyadda D/Hoose.
18. Daryeelka Horumarinta Miyiga iyo dhiirigelinta wax soo Saarka iyo abaabulidda.
19. Dhiirigelinta Mashaariicda isku tashiga Bulshada.
20. Habaynta Hawlaha aaska (Qubuuraaha) astaynta dhulka Qabuuraha.
21. Samayn goobo nasasho, wax akhris iyo Daawasho.

22. Isku dheeli tirka baahida shaqo xadaynta, qorshaynta iyo jaangoynta shaqaalaha ka hawl gelaya waaxyaha D/Hoose, iyadoo laga duulayo hadba heerka shaqaale iyo Darajada Degmo kasta.
23. Ilaalinta iyo Daryeelka Goobaha taariikhiga ah.
24. Dhiiri galinta Madax Banaanaynta (Privatisation) iyo maal galinta wadjireed (Joint Venture) ee dawlada iyo shirkadaha gaarka ah ee adeegyada Bulshada sida Biyaha, Nal-ka Iwm.

ISKAASHIGA DEGMOOYINKA WALAALAH AHAH

U rurka dawlada hoose ee Somaliland waxay ugu deeqeen dagmada sheekh gaadhi booyad ah. Booyadaas oo qaadi karta 9000-liter ama 45 foosto. Booyadaas oo ka caawin doonta waxbadan oo ay degmada baahi wayn ay u qabtay. Booyadaas oo iibinteeda ay iska kaashadeen sadax degmo iyo ururka dawlada hoose ee Somaliland degmooyinkaas oo kala ah hargeysa berbera iyo gabiley. Tasi waxay kamid tahay iskaashiga u dhaxeeya degmooyinka Jamhuuriyada Somaliland waana sababta loo sameeyay ururka dawlada hoose ee Somaliland (ALGASL), sidaa darteed ururka dawlada hoose ee somaliland waxay ku dhiiri galinayaan dhamaan dagmooyinka jamhuuriyadda somaliland inay iska kaashadaan dhamaan wixii wax tar u ah bulshada ay u adeegaan.



SHAQO HUFAN

Dawladda hoose ee Degmada Say-lac waxay masuul ka tahay adeegyada aasasiga ah sida nadaafada waxbarashada, caafimaadka, biyaha IWM

Waxay leedahay qorshe saddex bilood leh (quarter) ah oo ay mashaariicda ku sii dayso degmadu, mashaariicdaas oo ka mid ah adeegyada kala duwan ee degmadu qabato.

Saddex bilood kasta marka ay gaadho waxaa shir isugu yimaada kooxda ama gudida mashaariicda degmada oo haya qiimaynta mashaariicdii hore ee la sii daayey halka ay marayaan iyo kuwa hada raba in la sii daayo

Waxay shir lagaan gudida fulinta unna soo bandhigaan xogtii mashaariicdii hore, unna soo jeediyaan ay siidaynayaa mashaariicda saddex biloodkan ku jirta.

Masiiliyada gudida qandaraasyadu waa in ay ogyihiin hantida lacageed ee u taala mashaariicda ay sii daynayaan,

Waxay diyaariyaan xayeysiintooda iyo dhamaan hanaankii ay ku bixi lahayd mashaariicdaasi

Waxay raacaan hanaankii qorshayneed iyo kala mudnaansiinta mashaariicda kunna ilaaliyaan numberiska la kala siiyey.

Intii ay gudidan qandaraasyada degmadu dhisan yihiin waxa Meesha ka baxay mashaariicdii wakhtigu ka dhici jiray

Waxa qabsoomay dhamaan mashaariicda ama inta ugu badan sanadkasta, waxa fulay dharciyadii mashaariicda oo maray

hanaankii sharciga ahaa

Waxa batay shirkadaha tartanka ka qayb qaadanaya, sidoo kale dakhliga degmada xaga liisamada shirkadaha ayaa kordhay.



DIWAANGALINTA HANTIDA MAGUURTADA EE MAGAALADA GABILEY

Mashruuca Diwaangalinta Hantida Maguurtada ah ee magaalada Gabiley waa mashruuc loogu talagalay in loogu sameeyo guryaha iyo waddooyinka magaalada Gabiley sum-mado sax ah si loola jaanqaado qaababka casriga ah ee helitaanka guryaha iyo waddooyinka. Mashruucu waxa uu fududayn doona adeeg-bixinta bulshada ee biyaha, laydhka, qashin gurka iyo adeegyada degdegga ah ee gaadiidka gurmadka caafimaadka, dabdamiska, iyo nabadgalyada. Waxa kale oo uu fududaanayaa nidaamka cashuur qaadista guryaha iyo dhulka bannaan, yareynta muranka dhulka, sidoo kale waxaa uu sahlayaa tirakoobka guryaha magalada taasoo guri kastaa yeelan doono astaan u gaar ah. (House number) oo lagu aqoonsado.

Mashruucani waxa uu soo maray marxalado kala duwan oo ay ka mid yihiin la-tashiyada Golaha Deegaanka, agaasimayasha waaxyaha iyo gudoomiyayasha xaafadaha si loo magacaabo guddi farsamo iyo Kormeer. Waxa lala-tashaday wacyigalinnna loo sameeyay bulshada oo iyaguna qayb muhiima ah ka ahaa fulinta mashruucani iyo waliba tabobarka halwadeennada qabanayey.

Shaqadu waxa ay socotay July, 20, 2022 ilaa October, 13, 2022 waxaana la diwaan-galiyey 8,725 oo iskugu jira guryo iyo dhul banaan. Degmada Gabiley ayaa ah deg-

madii ugu horraysay ee mashruucan diiwaangalinta hantida maguurtada ah laga hirgeliyo, Diiwaangalinta dhulka iyo guryaha bannaan oo ku dhammaan lahayd muddo sannad ah ayay Dawladda Hoose Degmada Gabiley ku soo gabogabaysay muddo laba bilood ah iyada oo ka faaiid-eysanaysay aqoonta iyo hawl-karnimada

shaqaalaha dawladda Hoose ee Gabiley.

Ujeeddada mashruucan laga leeyahay ayaa ah horumarinta iyo ilaalinta hantida maguurtada ah ee magaalada Gabiley. Waxa kale oo ujeedooyinka mashruucan ka mid ah adeegsiga qaab summadeedka casriga ah ee guryaha loola ula jaan qaadi karo qaababka cusub ee caalamku summada guryaha u adeegsadaan. Waxa kale oo uu mashruucani innaga caawin karaa helitaanka diiwaanka guryaha ku jira buugga diiwaanka dhulka iyo guryaha. Waxa kale oo uu sahlayaa helida xaaladda dhaqan-dhaqaale iyo tirakoobka saxda ah ee bulshada.



SHEIKH

HORUMARINTA DUGSIYADA WAXBARASHADA EE DEGNADA SHEIKH

Mayor Eng Ismail Hussein Ali, Xoghayaha Ali Ahmed X Abdilahi iyo Xil Caydiid Qayre Xaashi Ayaa Xadhiga Ka Jaray Dhisme Ay Dawlada Hoose ee Deg Sheikh ku Kordhisay Dugsiga Hoose ee Sh Aadan Kulmiye.

Dhismahan oo isugu jira Office iyo Store Ayaa Ka mida Dhismayaal Badan oo Golaha Uu Hogaaminaayo Mayor Xabeeb ay Ka Dhiseen Degmada mudadii ay Xilka Hayeen.

Sidoo kale Mayorka Degmadu waxa Uu kormeer iyo Dhiiri Galin u Sameeyay Ardayda Wax ku Barata Dugsiga Sh Adan Kulmiye Primary School oo ahaa Halkii Uu Classkii Kowaad Ee Hayaankiisa Waxbarasho kasoo Bilaabay.



BAKI

HORUMARINTA WADDOYINKA IYO DEGNADA BAKI

Dawlada hoose ee degmada baki ayaa bilawday banaynata iyo dhista wado dhan 12km oo isku xidhi doonta degmada baki ilaa dhabi-adag taas waxtar u yeelan doonta isku xidhka labada magaalo wax tarna u yeelan doonta bulshada ku dhaqan labada magaalo.



LUGHAYA

DAWLADA HOOSE EE DEGMADA LUGHAYA OO DHAGAX DHIGTAY XAFIISKA WASAARADA XANAANADA XOLAHA

Mayor Ku Xigeenka Degmada Lughaya, Xoghayaha Fulinta Dawlada Hoose Iyo Xubno Ka Socday Hayadda Save Children Iyo Wasaarada Xanaanada Xoola Iyo Kalumaysiga Ayaa Si Wada Jir Ah U Dhagax Dhigay Xafiiska Wasaarada Xanaanada Xoolaha Iyo Kalumaysiga Qaybtiisa Xanaanada Xoolaha, Kaas Oo Laga Dhisi Doono Magaalada Gargaara Oo Ka Tirsan Degmada Lughaya.

Dhismaha fulintiisa Waxa Iska Kaashanaya Hayadda Save Children Iyo Wasarada Halka Dawlada Hoose Ee Degmada Lughayana Ku Deeqada Dhulkii Dhismahaas Laga Fulin Lahaa.

Mayor Ku Xigeenka Degmada Lughaya Maxamed Bare Iyo Xubno Ka Socday Hayadda Save Children Ayaa Manta si Wada Jir Ah U Dhagax Dhigay Mashruuca Biyo Balaadhinta Magalada Lughaya, Kaas Oo Ka Kooban Qodida Ceel Cusub Oo Riig Ah, Dhisida Tangi Wayn Oo Kayd Ah Iyo Magalada Gudaheeda Oo Biyo Balaadhin Lagu samaynayo Taas Oo Lagaga Bixi Doono Baahi Dhinaca Biyaha Ah Oo Ay Magaladu Tabaysay.

Hayadda Save Children Oo Mashruucan Fulinaysana Waxaan Ka Maamul Ahaan Uga Mahad Celinaynaa Sida Dhakhsaha Badan Ee Ay Uga Soo Jawabeen Codsigii Aan U Gudbinay.

Dhismaha Mashruucana Waxa Uu Bilaaban Doona Todobaadkan Gudahiisa.

sidoo kale waxay dawlada hoose ee lughaya iyo Wasirika qorshaynta Dr buuxane dhagax dhigeen dhisme cusub oo lagu so kordhinayo schoolka sare ee GEB boarding secondary.



LAASCAANOOD

DIB U HABAYNTA XAFIISKA DAWLADA HOOSE EE DEGMADA LAASCAANOOD

Dib u habayn balaadhan ayaa lagu sameeyey xafiisyada kala duwan ee Dowladda Hoose ee Degmadda laascaanood.

Hoolka shirarka Degmadda Laascaanood oo kamid ah goobaha ay Masuuliyiinta degmadu Ku qaabilaan bulshadda degmada iyo Masuuliyiinta hawlaha shaqo u yimaada Laascaanood ayaa dib u casriyayn iyo qurxin lagu sameeyey.

Geesta kale Xafiisyadda Maayarka Maayar ku xigeenka iyo Xoghayaha Fulinta Degmadda oo dhamaan tood ah murayadda shaqo ee Masuuliyiinta degmada ayaa dib u casriyayn iyo kor u qaadis Bilicda ah lagu sameeyey.

Iyadoo laga duulayo Ka jawaabista murayadda Laascaanood oo ah xafiisyada ay Masuuliyiinta degmadu Ku qaabilaan cid walba oo degmada soo booqata ayaa dib u habayn balaadhan lagu sameeyey waxaana dhawaan Xadhiga ka jari doona Masuuliyiinta Degmadda oo uu hormuud u yahay Maayar Cabdiraxiin Cali Ismaaciil



LAAS QORAY

BIYO GALINTA IYO DAYACTIRKA WADOOYINKA DEGMADA LAAS QORAY

5 Bilood Ee Ugu Dambeeyey Degmada Laas-Qorey Waxaa Aan Wax Ka Qabaney Waa,

Biyo Gelinta Degmada Laas-qorey Oo Gaar Ahaan Xaafada Laas-qorey Oo Ka Mid Ah Xaafadaha Ugu Waa Weyn Degmada Uguna Baahiyaadka Badnaa Dhinaca Biyaha,

Hagaajinta Iyo Dayac Tir Wadada Geel-Doora Iyo Degmada Laas-qorey Oo Iyana Lagu Sameeyey Hagaajin Iyo Baneyn Waana Wado Muhiim U Ah Gudah Degmada Laas-qorey Waana Wadada Isku Xidha Degmada Laas-qorey Iyo Degmada Badhan Ee Xarunta Gobolka Badhan, Waa La Buux Buuxiyey Meela Buundooyina Waa La Hagaajiyey Oo Wa La Simey.



BUUGA WAX QABADKA DAWLADA HOOSE DEGMADA XUDUN

Dawlada hoose degmada xudun tan iyo markii la doortey golaha deegaanka degmada xudun waxa u qabsoomey waxyaabo badan iyadoo marba marka ka danbeysa ay isasoo tarayaan hormarka ay kutalaabsanayaan gudoomiyaha iyo golihiisa deegaanku ugu horeynba golaha deegaanku waxa ay markii ay xilka lawareegeen ku guuleesteen furitaanka iyo ka shaqaysiinta xarunta degmada ama dawlada hoose sidoo kale waxa ay qalabeyn ku semeeyeen isla markaana ay fadhiisteen xafiisyadii xarunta degmada xudun ee dawlada hoose oo markii horena xidhneyd uguna adeegeen bulshada reer xudun.

Wax ay markii labaadna ay baneeyeen wadooyinkii magaalada dhex marayay sida wadada halbowlaha u ah degmada xudun oo sarfey laga saaray caro tuurna la dhigey isla markaana labalaariyey sida oo kalena waxa laga gurey dhagaxaan iyo dhisme soo galey wadada oo dad lahaayeen dawlada hoose waxa ay lambaro u kala sameysey wadooyinka iyo guryaha magaalada (line street).

Waxa kale oo ay dhir beeris kusameysey dhamaan xaafada magaalada sida guryaha hortooda xarunta dawlada hoose iyo goobo kale waxa kale oo dhirtaa la gaadhsiiyey qaar ka mida tuulooyinka ay degmadu xukunto sida magaalada bohol lafweyne si ay bilicda magaalada wax looga bedello muuqaal wacana u yeelato.

Waxana ay markii u horeysey xudun keeneen gaadiidkii nadaafada ee magaalada

da oo baahiweyn loo qabey isla markaana waxa ay usameeyeen shaqaalle hawsha nadaafada ku darban oo ay ku mushahar siiso dawlada hoose kaas oo ah hal iska rogo iyadoo aaney markii hore jirin wax gaadiid ah oo ka shaqeeeya nadaafad degmada oo dawli ah

Golaha deegaanka iyaga oo ka duullaya baahiyaadka kala duwan ee ka jira deegaanka isla markaana u eegaya sida ay ukala horeyso baahidu ayna qiimeynayaan sida loo dabooli karo waxa ay u hawl galeen in la helo sariibad ay fadhiistaan hooyooyinka waxana ay dhiiseen oo hir geliyeen dhismaha sariibada xudun oo iminka lagu shaqeeyo hilbluhuna kaga raystey qoraxdii iyo dabeyshii ku dhicijirtey.



HARGEYSA

GAADIIDKA/QALABKA & WARSHADDA CONCRETE BATCHING PLANT- KA DAWLADDA HOOSE EE HARGEYSA IIBSATAY.

No	Machines /Equipment/Tools	Items
1	26 tan Mercedes Mobile Concrete Pump	1
2	CAT wheel Excavator M318D 18 tonner With One 1M Bucket	1
3	Sinotruact 20ton CNHTC	1
4	CAT 303.5E 5tonner with 60cm bucket	1
5	Mini truck Linteace 4WD (MJ J3584)	1
6	Concrete Mixer (NG B1253)	1
7	Concrete Mixer (NG B1254)	1
8	CAT Wheel loader 906H2 9toner with 2m bucket 2015	2
9	Tower light (3.5KVA) Wacker Neuson	4
10	Pramac (GSW 150)Power Generator	1
11	VX Land Cruiser Silver Color	1
12	Elkomix-350 Quick Master concrete batching Plant	1
13	Water System Of Batching Plant	1
14	Compaction test Mechine	2
15	GPS Instrument	1
16	Plate Compactor mechine model no.1B30-2i 4.2KVA	4
17	Asphalt Cutter WAKEN NEUSON	1
18	Air filter Mercidese concrete pump	2
19	Site office container with 1 chair & table	1
20	level Survey COL 320	4
21	CAT chain excavator 329E LN with 1.3m bucket 2014	1
22	Mercedes Mobile crane with mulfunctional crain	1
23	VX Land Cruiser Silver Color (B1285)	1
24	Hydorlic hummar NPK GS12 (CAT 318 D)	1
25	WAKEN NEUSON roller compactor	1
26	total Station	1
27	Concret Plate Smoothing	2
28	Batching Plant Spare Parts	1
29	Concret Pump Truck Spare Parts	1
30	Wheel Loader Tires	4
31	Concre Mixer Tires	2



BOORAMA

HORUMARINTA LAAMIYADA MAGAALADA BURCO

Dawlada hoose ee burco ayaa bi-lawday dhisida dayac-tirka iyo banaynta wadooyinka magaalada burco. taas oo wax tar u yeelan doonta gaadiidka iyo bulshada isu socodkooda taas oo wax ka tari doonta huru-mar-ka iyo qurxinta magaalada. Wadooyin kaas oo hada qaarana la dhagax dhigay kuwana xadhiga laga jaray sida wadada faarax oomaar oo ah wado 2 km hada oo si casriya loo dhisi doono iyo kuwo kale oo iyagana gacanta lagu hayo. waxayna burco tahay meelaha aynu u baahanahay inaynu ku dayano sida fiican ay hada u shaqeeyaan golaha deegaanka ee dag-mada burco.



GAR ADAG

GURIGA MARTIDA DEGMADA GAR-ADAG

Dawlada Hoose Degmada gar-adag tan iyo markii la doortey golaha deegaanka degmada gar-adag waxa u qabsoomey waxyaabo badan.

Hadaba Dawlada Hoose Ee Degmada gar-adag waxay kutalaabsatay horumar balaadhan iyadoo fulisay qorshaha sanadlaha ah 2022, iyadoo dhistay guriga martida Ee Faraguul. taas oo ay degmadu kusoodhaweyn doonto martida. Gurigan martida Ee dawlada hoose Ee Degmada gar-adag kadhista wuxu noqon doona meel ay madaxda Degmada timada kunastaan.



DHAHAR

HORUMARINTA CAAFIMAADKA DEGMADA DHAHAR

Si loo helo adeeg Caafimad oo dha-maystiran waxay Dowladda Hoose Degmada Dhahar ee JS ka hirgal-isay Dhahar waarar caafimad oo baahi wayn ay u qabeen bulshada ku dhaqan degmada dhahar, Waararkan ayaa Da-booli doona baahi caafimad oo balaaran.



BERBERA

KA HOR TAGA CUDURKA DENGUE FEVER IYO DAWLADA HOOSE EE BEBRERA

Dawlada hoose ee degmada Berbera ayaa saaka bilowday olale buufin ah oo lagaga hortagayo in magaalada Berbera ay ku dhalato kaneeco maadama oo lagalay wakhtigii jiilaalka, olalahan ayaa lagaga hortagayaa kaneecada iyo dukhsiga.

Goobaha la buufiyay ayaa ah goobaha badanaa qoyan ee biyaha leh si looga hortago in kaneecadu ugxan dhigato goobahaas, waxaana ka mid ah goobahaas

1. Cisbitaalka weyn ee magaalada Berbera
2. Xanaanada dhexe
3. Sariibada weyn
4. Dugsiga Saaxil
5. Dugsiga Cumar bin khadaab
6. Kawaanka xoolaha



BADHAN

HORUMARINTA ADEEGYADA CAAFIMAAD EE DEGMADA BADHAN

Dawladda Hoose Ee Degmada Badhan Ee Somaliland Ayaa Magaalada Gumar Ee Degmada Badhan Ka Hirgalisay (MCH) Hooyada Iyo Dhallaanka waxaana Xadhiga Si Wada jir Ah uga Jaray Guddoomiyaha Gobolka Badhan Maxamuud Xaamud Cumar iyo Mayarka Degmada Badhan Cabdale Maxamuud Cabdi.



BALIGUBADLE

DARDAR-GALINTA ADEEGYADA CAAFIMAADKA IYO DEGMADA BALIGUBADLE

Dawladda Hoose ee Degmada Baligubadle ayaa Mudooyinkii ugu Dambeeyey ku Hawlanayd Dardar-galinta Adeegyada Caafimaadka iyo Dib u Dhiska Goobaha Caafimaadka Hooyada & Dhallaanka (MCHs) ee qaar ka mida Deegaanada hoos yimaada Degmada Baligubadle.



BOORAMA

DAYACTIRKA WADOOYINKA DEGMADA BOORAMA.

Dawladda hoose ee degmada boorama waxay abuurtay qaybta dayac-tirka wadooyinka degmada boorama oo ah qayb ka tirsan waaxda hawlaha guud ee dawlada hoose.

qaybtu waxay si joogta ah uga shaqaynaysaa dayac-tirka wadooyinka si loo helo wadooyin tayo leh oo mudo dheer shaqayn kara, qaybtu waxay dayac-tirtay 3 wado oo halbowle ah oo magaalada mara, kuwo badana way u hadhsan yihiin. Shaqadan waxay noqon doontaa mid joogta ah oo aan istaag lahayn waxaana meesha ka baxaya burburkii wadooyinka. Tayaynta wadooyinka magaaladu waxayna sahlayso isku socodka gaadiidka iyo bulshada, taas oo kor u qaadi doonta horumarka Boorama.



CAYNABA

HORUMARKA DEGMADA CAYNABA

Wadada halbawlaha ah ee dhexmarta degmada caynabo oo la dayac tiray masaafo dhan 2.511 km wadadan oo uu ka muuqday bur bur laxaad leh ayaa laga maal galiyay dakhliga degmada ee loo yaqaano kabka dawlada dhexe.



TALEEX

DIB QALABAYNTA XARUMAHA DAWLADA HOOSE EE DEGMADA TALEEX

Waxay maamulka dawlada hoose ee taleex dib u dayactir iyo dib u qalabayn ku sameeyay xarumaha dawlada hoose ee degmada taleex iyo kan gobolka xaysimo. Dib u dayactirkaa iyo qalabayntaa oo isugu jira dhismayaal gabooyay oo ay degmadu dib u dayactirtay iyo xafiisyo ay dhigtay computer iyo printers xafiisyadaa oon hore u lahayn qalabkaa shaqaalaha degmada u fududeeya shaqadooda.



TABABARKA DIYAARINTA QORSHE SANADEEDKA DEGMOOYINKA SOMALILAND

Tababar socday muddo saddex maalmood ah oo ku saabsanaa Qorshaynta Sannadlaha ah ee Degmooyinka, ayaa waxa soo qaban-qaabiyey Ururka Dawladdaha Hoose ee Somaliland (ALGASL), waxaana lagu qabtay Huteelka Maansoor ee magaalada Hargeysa; Intii u dhaxaysay 18 -20 June 2022. Tababarku waxa ka soo baxay wakiilo ka kala socday shan iyo toban degmo oo Somaliland ah. Xubnaha ka soo qayb galay waxa ka mid ahaa Moyarro iyo agaasimayaasha qorshaynta ee Baki, Lughaya, Salaxlay, Bali-gubadle, Laasqoray, Badhan, Dhahar, Caynabo, Ceel-Afweyn, Gar-adag, Buuhoodle, Laascaanood, Taleex. Tababarkan ayaa ahaa mid diirada lagu saarayay sidii kor loogu qaadi lahaa tayada maayarka iyo agaasimayaasha qorshaynta samaynta iyo horumarinta qorshahooda shaqo ee sanadlaha ah. Tababarkan ayaa waxaa fududeeyey laba khabiir oo khibrad leh oo kala ah; Yuusuf Maxamed iyo Axmed-Keyse Cali Rooble oo ay caawinayaan kooxda ALGASL

Ujeedooyinka

Ujeedooyinka tababarkan ayaa ahaa in la tababaro laguna hago masuuliyiinta Dawladda Hoose si ay u kobciyaan gaaradkooda iyo aqoontooda ku wajahan diyaarinta qorshayaasha shaqo ee sannadlaha ah iyo sidii ay uga gudbi lahaayeen qorshayaasha qorshaynta horumarineed si ay u daboolaan baahiyaha ku salaysan qorshe hawl-qabad. La jaanqaadi kara Somaliland. Qorshaha Horumarinta Qaranka.

Habka

Shaqaalaha ALGASL waxay adeegsadeen doonaan habab kala duwan si ay u bixiyaan Tababarka 15ka degmo. Hababka waa:

- Bandhigga PPT
- Hababka iyo habraacyada daabacan
- Fadhiyada wada xaajoodka kooxda diiradda FGD
- fadhiyada maskaxda ee degmooyinka ee ku saabsan qorshaha shaqo sannadeedka
- Bandhigyada shaxda

Natiijooyinka Tababarka

Tababarkan oo socday muddo saddex maalmood ah ayaa ku soo dhamaaday si guul ah iyadoo ka soo qayb galayaashu ay muujiyeen is fahan, aqoon iyo karti, diyaarinta shaqo maalmeedkooda iyo qorshe miisaaniyadeed oo waafaqsan habraaca qaranka. Somaliland. Ardaydii tababarka loo soo xiray ayaa uga mahadceliyay fursadda ay heleen, waxayna tilmaameen inay ka faa'ideysan doonaan oo ay aqoonta iyo xirfadda ay barteen u gudbin doonaan shaqooyinkooda iyo degmooyinkooda.

Awoodda aqooneed ee degmooyinka ee diyaarinta Qorshaha Shaqada ee Sannadlaha ah waa yoolka ugu weyn ee hawsha. Dhammaadka tababarka, shaqaalaha degmadu waxay awood u yeelan doonaan inay horumariyaan oo ay horumariyaan qorshe sannadeedkooda.



THE TRANSFORMATION OF KIGALI INTO AFRICA'S CLEANEST CITY & WHAT WE CAN LEARN FROM IT


Due to various policy initiatives undertaken by the Rwandan government, Kigali has now emerged as the cleanest city in Africa.

Kigali, the capital city of the African nation Rwanda, was in the news on 22 June as it hosted more than 50 Commonwealth countries for the 2022 Commonwealth Heads of Government Meeting (CHOGM), held under the theme, 'Delivering a Common Future: Connecting, Innovating, Transforming'. This was one of the many international events hosted in the city. It has been ranked the second most popular destination in Africa for hosting international conferences and events by ICCA (International Congress and Convention Association).

However, a fact much less talked about and massively contributing to Kigali's attractiveness is the remarkable turnaround the city has achieved in sprucing up the city to be recognised as the cleanest city in Africa. In 2018, UN Environment Programme Head Eric Solheim referred to Kigali as the "cleanest city on the planet", both in terms of lack of street rubbish and green initiatives. Those who have recently visited Kigali have expressed happy surprise at the exceptional levels of hygiene and cleanliness that the city continues to display. Indeed, Kigali has become a world icon in urban transformation.

In 2018, UN Environment Programme Head Eric Solheim referred to Kigali as the "cleanest city on the planet", both in terms of lack of street rubbish and green initiatives.

How was this turnaround achieved? At the turn of this century, Kigali was like any other city with lots of people, slums, and waste. The situation was made worse by rapid demographic growth in the capital. From about 350,000 in 1996, the city is housing close to 1.2 million people today, expected to grow further. This sudden upsurge in inhabitants resulted in indiscriminately erected housing leading to a rise in informal settlements. However, towards the end of the first decade of this century, city authorities, with national government backing, decided to turn the city around. In 2008, as a first step, the city banned single-use plastic bags. Plastic packaging material was also prohibited. Kigalians were asked to switch to bags made of degradable materials such as paper, linen, banana leaves, and papyrus. Penalties for breaking these regulations were severe and could even lead to imprisonment. At the same time, the government encouraged entrepreneurs to set up facilities for the manufacture of permissible packaging material. The local government also began



a drive to green the city with urban forestry and tree plantation initiatives.

The local communities played a significant role in the effort at cleanliness. On the last Saturday of every month, the Kigalians observe 'Umuganda'—the community self-help and cooperation practice. In traditional Rwandan culture, community members would call upon their family, friends, and neighbours to assist them in accomplishing a difficult task. In the same vein, the Kigalians clean areas of the city, picking up every bit of trash lying around. This participation also extends to building new roads, clearing land for community gardens, and constructing new classrooms or residential toilets for families that do not have them. During Umuganda, shops in the city remain shut, and cars are off the roads to facilitate the drive. Kigali has made participation in 'Umuganda' mandatory, and non-participation could result in hefty fines. Besides enforcement, the authorities also organise awareness campaigns to make cleanliness a part of Kigalian culture. Aesthetically designed waste bins are carefully placed in public places, including footpaths, shopping areas, and transportation hubs.

Kigalians were asked to switch to bags made of degradable materials such as paper, linen, banana leaves, and papyrus.

In 2009, the city authorities, in the course of the cleanliness drive, realised that the city had grown haphazardly in certain sectors.

Some semblance of order was required in the capital that needed more roads, green spaces, and reconfigured land use. Towards achieving this, they first took up the demolition of poorly built and poorly serviced slums and unauthorized construction to make way for new roads and better housing. This obviously led to resistance from the slum-dwellers that were displaced. A program, therefore, had to be started targeting to resettle the displaced population and compensate them for their losses.

Preliminary experiences also directed the authorities to draw up a more comprehensive master plan for Kigali that comprised multiple aspects of the city that needed re-engineering—environment, transportation, traffic congestion, signages, and social inclusion. To reduce traffic congestion, the Rwandan government invested US \$76 million to pave narrow streets, widen all main roads to dual carriageways, and refurbish signages. The city also upgraded its bus services between the suburbs and the city centre, encouraging citizens to use public transport. The local government also banned minibuses and cars from entering the central city areas. The Rwandan government spent US\$ 40 million to relocate factories to a newly crafted Special Economic Zone (SEZ) to remove them from wet areas. Many other businesses displaced by the cleanliness drive were provided compensation and help in relocation. However, the unauthorised ones received no such assistance.

The Rwandan government spent US\$ 40 million to relocate factories to a newly crafted Special Economic Zone (SEZ) to remove them from wet areas.

TO BE CONTINUED

ABOUT ALGASL

The Association of Local Government Authorities of Somaliland (ALGASL) is a non-profit organisation and was established by the local government' mayors on February 2006 in Hargeisa, with the aim to provide support to the local authorities, coordinate activities that benefit the performance of the local government institutions and their employees. The association also wants to raise the awareness of local government issues, with share experiences and best practices and find solutions for common problems. ALGASL focuses on developing and providing services to municipalities through support to the capacity development; the promotion of closer collaboration among districts and, harmonious and efficient relations with Somaliland central government. ALGASL wants to become the representative voice of local authorities in Somaliland and abroad; to that end, the association will operate through local, regional and international networks and strategic partnerships with organisations which have similar objectives.



- 1**
Udoodista iyo Matalida

 - Udoodista iyo ku matalida degmooyinka dawladaha hoose waxii masaalix ee la xidhiidha qorshayaasha maamul ay leeyihiin degmooyinka dawladaha hoose
- 2**
haayad shaqo bixineed

 - In uu dhaqmo sidii haayad shaqo bixineed oo matalaysa dhamaan golyaasha degmooyinka si layskugu xidho arimahooda hab heshiis ah
- 3**
Kor u qaadista awooda haayada

 - Dhisida awooda haayada iyo mida hogaamineed ee farsamo ee ay leeyihiin degmooyinka dawladaha hoose iyo saraakiisha maamul ee dawladaha hoose
- 4**
Taageerida iyo talo bixinta

 - Taageerida iyo talo bixinta xubnaha ururka dawladaha hoose iyo arimaha maamul si looga caawiyo inay u gutaan shaqooyinkooda si wax ku ool ah
- 5**
Dhisida qorshe wax lagu gaadho

 - In la dhiso sumcada iyo muuqaalka ee ay leeyihiin dawladaha hoose si heer gobol ah iyo heer caalami labadaba
- 6**
Wadaagista xogta

 - U adeegida sidii loo ilaalin lahaa xogta iyo aqoonta ee xarumaha dawladaha hoose isla markaana ay u noqon lahayd xarunta macluumaadka ee ay leeyihiin dawladaha hoose

The voice of local government

KOOXDA TAFATIRKA

FAARAX CABDI
MUKHTAAR DAYIB
BILAN AXMED
HINDA DIIRIYE
SICIID NUUX
CABDILAAHI MAXAMED
AMANI YUUSUF

NASHQADA: CABDILAAHI MAXAMED

MAGAALO

MAGAZINE